

Tuberculosis: The Facts

Tiibishada: Xaqiiqooyinka

Waa maxay Tiibishadu?

Tiibishadu (waxaa kaloo loo yaqaan TB) waa cudur bakteeriyadu ay dhaliso (jeermis). Tiibishadu badanaa waxay waxyeeshaa sanbabada, laakiin waxay ku fidi kartaa kelyaha, lafaha, lafdhabarta, maskaxda iyo qaybaha kale ee jirka.

Sidee tiibishadu ku fidaa?

Tiibishadu waxay ku fidaa hawada marka qof qaba tiibishada kelyaha oo aan daawa qaadani ku qufaco ama ku hindhiso hawada. Si qof tiibishada hawada uga qaato wuxuu badanaa u baahan yahay inuu xiriir dhow oo maalmeed la leeyahay qof qaba cudurka. LAGUMA fidiyo suxuunta, koobabka, cuntada, qalabka wax lagu cuno, liilanka ama dharka.

Sidee tiibishadu wax u yeeshaa jirka?

Infakshanka tiibishada

Infakshanka tiibishada macneheedu waxa weeye qofku wuxuu qabaa jeermiska tiibishada. Badanaa difaaca qofku wuxuu awoodaa inuu la dagaalamo jeermiska, kuna kalifo inuu noqdo mid aan kacsanayn. Boqolkiiba sagaashan (90%) dadka jeermiskoodu wuxuu ahaanayaa mid aan kacsanayn. Dadka qaba infakshanka tiibishadu ma jirana dadkana kuma fidin karaan tiibishada. Midkaana waxaa loogu yeeraa infakshanka tiibishada **aan kacsanayn**.

Cudurka Tiibishada

Cudurka tiibishadu waa jiro uu dhaliyey jeermiska tiibishada oo **kacsan**. Jirada waxaa laga yaabaa inay qofka ku dhacdo waxyar ka dib marka jeermisku galo jirka, ama sanada badan ka dib marka difaaca jirku daciifo sababa ay ka mid yihiin gabow, sonkorow, infakshanka HIV, cudurka kelyaha ama kansar dartiis. Qofka qaba cudurka tiibishadu wuxuu leeyahay jeermiska tiibishada oo kacsan oo lagu **DARAY** calaamadaha jirada.

Waa maxay calaamadaha Tiibishadu?

Tiibishadu waxay weerari kartaa qayb kasta oo ka mid ah jirka laakiin sanbabada ayaa ah goobta ugu badan. Dadka qaba cudurka tiibishada ayaa laga yaabaa inay leeyihiin calaamadahaan soo socda dhamaantood ama qaarkood.

- Dareemid daal joogta ah
- Rabitaanka cuntada oo kaa luma
- Miisaanka oo dhaca sababa aan la aqoon dartood.
- Qufac ka badan saddex asbuuc
- Xumado
- Dhidid habeenkii ah

Mararka qaarkood qofka qaba tiibishada waxaa laga yaabaa inuu qufaco xaako dhiig la socdo. Dadka qaba cudurka tiibishada kacsan qaarkood ayaa waxaa laga yaabaa inay leeyihiin calaamada sahlan keliya.

Waa maxay baaritaanada guud ee tiibishadu?

1. **Baaritaanka maqaarka ee tiibishada** (baarida Mantoux) waxay muujisaa haddii ay u badan tahay in qofku qaaday cudurka.
2. **Raajada feeraha** waxay muujisaa haddii tiibishadu ay wax yeeshay sanbabada
3. **Baaritaanku xaakadu** wuxuu muujiyaa haddii jeermiska tiibashadu ku jiro xaakada.

Yaa laga baarayaa tiibishada?

- Dadka leh calaamadaha cudurka tiibishada midkood.
- Dadka la nool si dhowna ula shaqeyaa qof qaba ama looga shakisan yahay inuu qabo cudurka tiibishada sanbabada.
- Dadka qaba infakshanka HIV ama jirooyinka kale oo khatar qofku ugu noqon karo cudurka tiibishada.

Sidee tiibishada loo daweyyaa?

Infakshanka tiibishada: waxaa laga yaabaa in dhakhtarku qoro kaniini muda-cayiman la qaadanayo ama lagula dabasoconaya qaadida raajo feeraha ah.

Cudurka tiibishada: Antibiyootik la isku daray oo khaasa ayaa la qaataa ugu yaraan lix bilood. Waa muhiim in la xassuusto in tiibishada si sahlan lagu daaweyn karo. Si kasta ha ahaatee tiibishadu waa soo noqon kartaa wayna adkaan kartaa in la daaweeyo haddii daawooyinka aan si joogto ah loo qaadan inta lagu taliyey.

Dadka tiibishada qabaa mar walba cudurka ma fidiyaan?

Dadka qaba cudurka tiibishada sanbabada ama cunaha waa qaadiin karaan dadka kale. Dadka tiibishada ka qaba meelaha kale ee jirka ma fidiyaan cudurka. Xaalladaha badankood, ka dib marka la qaato daawada laba asbuuc, dadka daawada qaataa ma fidinayaan jeermiska. Haddii qofku cudurka fidinayo kalkaalisada Barnaamijka Tiibishada ayaa qiimayn doonta dadka u baahan in la baaro samaynta arrintaasna qabanqaabin doonta. Kuwa ugu dhowi qaadida cudurka badanaa waa xubnaha qoyska laakiin saaxiibada la isku dhow yahay iyo kuwa la wada shaqeyyaana waa soo gelayaan baarida. Kuwa u dhow badanaa si xasaasi qarsoodina ah ayaa loo raadiyaa.

Ma iska talaali karaa tiibishada?

Talaalka BCG vaccination (talaalka tiibishada) badanaa laguma taliyo in dadweynaha Australia qaataan maadaama khatarta tiibishadu yar tahay. Talaalka BCG waxaa lagula taliyaa kooxa gaara oo khatar ugu jira tiibishada.

Wixii intaas ka badan la xiriir

Mycobacterial Infections Program
Communicable Diseases Section
Department of Human Services
GPO Box 1670N
Melbourne 3001
Telefoonka: 1300 651 160

Caawimada afka ama luqada waxaa laga yaabaa in la hello haddii la waco Adeega Afcelinta iyo Tarjumida Qoraalka [(Translating & Interpreting Service) TIS] nambarka 13 14 50 kharajka meesha aad joogto.

Qoraalka wuxuu ku qoran yahay afafka:

Carabi	Kaamboodiyani	Jayniis
Karooweeshiyani	Daari	Soomaali
Fiyatnaamiis		

Macluumaadkaan waxaa laga helli karaa Internetka:

<http://www.health.vic.gov.au/ideas>